




Oslo



Stafettloggen





Stafettlogg - Maxaa looga jeedaa stafettlogg?

Stafettlogg waa hab-wadashaqayneed oo dhijitaal ahaan loo diyaariyay kaas oo ka dhexeeya adiga iyo hay'ado kala duwan oo shaqadoodu tahay sidii adiga/ilmahaaga loo caawin lahaa.



Maxaa loogu talagalay in loo isticmaalo Stafettloggen-ka?

Stafettloggen waxaa loogu talagalay in uu fududeeyo wadashaqaynta ka dhexaysa guriga iyo xannaanada ama iskuulka iyo weliba hay'adaha kale ee iyana wadashaqayntu idinka dhexayso. Stafettloggen-ku waxa uu si hufan u muujiyaa waxyaabaha ay tahay in lagaa caawiyo, xalka laga gaadhi karo iyo caawinta aad isla garataan in aad u baahan tahay. Caawimo kasta oo aad helayso waxaa loo sameeyaa qof ka mas'uula oo ka hawl-gala habsami u socodka caawimada iyo waqti kamabayn ah dib u eegis lagu samayan doono caawimada.



Sidee ayay u shaqaynaysaa Stafettloggen-ku?

Stafettloggen waxaa la samaynayaa marka rabitaanku uu xaggaaga ka yimaaddo oggolaashana aad bixiso. Faamiliga ama qofka ay caawimadu khusayso ayaa iska leh lahaashaha Stafettlogg-ka, isaga ayaa leh oggoolasha cidda wax ka ogaan karta iyo ciddii kale. Si wax looga ogaado waa in qofku internetka ka galaa. Qof kasta oo rabo in uu galaa waxa uu ku gelayaa Bank-ID-giisa.



Stafettloggen-ka waxaa lagu diyaariyaa oo lagaga shaqeeyaa kulamada wadashaqayneed ee aad wada yeelataan idinka iyo hay'adaha kale ee arrintu khusayso. Qof xirfad u leh shaqada Stafettlogg-ka ayaa gacanta ku haynayaa stafettlogg-ka, qofkaas ayaana xidhiidh joogto ah la yeelanaya ilmaha/ardayga ay khusayso, qofkaas doorkiisu wuxuu noqonayaa «stafett-haye ama stafettholder». Stafett hayuhu waa qofka aad tooska ugala xidhiidhaysaan arrinta, isaga ayaa xidhiidhinaya hay'adaha kala duwan ee wadashaqaynta arrantu ay ka dhexayso, isaga ahaa diyaariya qoraalada kulamada wadashaqaynta ka soo baxa. Stafett-hayaha ayaa isugu yeedha ka qaybgalayaasha kulamada wadashaqaynta, isaga ayaa diyaariya dukomiintiyada ka soo baxa wixii lagu wada gaadho kulamada. Idinku markaad rabtaan ayaad furi kartaan Stafettloggen-ka oo eegi kartaan waxyaabaha ku qoran ee laysla wada go'aansado.



Wixii su'aalo ah

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto Stafettloggen-ka waxaad kala xiriiri kartaa xannaanada ama iskuulka ama xaafadda(bydelen) qaybta aad adeegga caawimo ka hesho. Waxa kale oo aad warbixin dheeraada oo ku saabsan safettlogg-ka ka akhrisan kartaa www.oslo.kommune.no/bti



<https://stafettloggen.conexus.no/Account/Index>